

**UJEEDO: WAKAALAD GUUD "PROCURO DE GENERALE"**

**Maanta** oo ay taariikhdu tahay **08/05/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Tajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

**WAKAALAD BIXISO:-** KADIJA AHMED OSMAN OMAR, Hooyo Shariifo Cabdille Abiikar, Somali ah, Ku Dhalatay: Wajir, Sanadkii: 1977, Sita: Kenyan passport, Lr. AK0234252

**LA WAKIISHE:-** HUSSEIN AHMED OSMAN, Ina Shariifo Cabdille Abiikar, Somali ah, Ku Dhashay: Wajir-East, Sanadkii: 01/01/1974, Degan Hawl wadaag, Sita: Kenyan passport, Lr. AK0117100

**B-** Aniga oo ah **KADIJA AHMED OSMAN OMAR**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **HUSSEIN AHMED OSMAN** una wakiishay qeybta dhaxalka ah ee aan ku leeyahay dhamaan wax allaale iyo wixii hanti ah uu lahaa kana geeriyooday Aabaheey Marxuum **AXMED CUSMAAN CUMAR** kuna Qoran Magaciisa Mood & Noolba leh, kuna taala Gobolka Banaadir & Gobolada kale ee dalka, sida guri, dhul banaan, goof, beer, Gaadiid, sheer shirkadeed, I.W.M

Waxaana si buuxda ugu wakiishay in Qaybtayda uu Xafidi karo, dayactiri karo, Gadi karo kireeyn karo, dhisi karo, Qareen ii Qaban karo hadii loo baahdo, Xanaaneyn karo, igu matali karo magaceyga dhan kasta la iiga baahdo, iigana doodi karo maxkamadaha dalka darajadooda kala duwan, iina sameen karo waraaqaha dhaxalkoobka ah, isla markaasna ii saxiixi karo kaalinteyda ku aadan dhamaan waraaqaha la iiga baahdo suul iyo saxiixba sida waraaqaha dhaxalkoobka ah, una idman yahay in uu si buuxda Maxkamaddaha hortooda iiga Doodi karo, insha'allaahu.

Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **HUSSEIN AHMED OSMAN** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Qeyb dhaxaleedkaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

**T-** Aniga oo ah **HUSSEIN AHMED OSMAN**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiisay **KADIJA AHMED OSMAN OMAR**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

**SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA**

KADIJA AHMED OSMAN OMAR

**SAXIIXA LA WAKIISHAHA**

HUSSEIN AHMED OSMAN

KADIJA

**SAXIIXA MARKHAATIYAASHA**

1- HASSAN ABDIKARIM HASSAN

2- IBRAHIMISSACK MOHAMED

**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

**REP. 1567/T.P.N/25, Tr. 08/05/2025**, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **KADIJA AHMED OSMAN OMAR** Ahna (Wakaalad Bixiso), 2- **HUSSEIN AHMED OSMAN** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.



NOOTAAYAHA

**Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**








**FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA**

**Tr. 24/07/2025**

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Xuseen Axmed Cismaan** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Guud ee **Rep No. 1567/T.P.N/25, Tr. 08/05/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>Magaca La Wakiishaha</b>	Xuseen Axmed Cismaan
<b>Nooca</b>	Wakaalad Guud
<b>Loo Wakiishay</b>	Dhamaan Hantida Wakaalad Bixisada Khadiijo Axmed Cismaan Cumar
<b>Taariikhda Wakaalada</b>	08/05/2025

**La Wakiishe:** Aniga oo ah **Xuseen Axmed Cismaan**, Leh Tel No. **0771916149**, Degan **H/wadaag** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



**SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA**

**Maxamed Cabdi Cali**

---

**SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA**

**Xuseen Axmed Cismaan**

---